18 – WARAYSIGA MAGANGALYO DOONKA

WAAMAXAY WARAYSIGA MAGANGELYO DOONKA?

Ujeeddada wareysigani waa in la fahmo sababta aad uga cabsaneyso in laguugu celiyo wadankaaga aad ka soo jeedo. Waa fursada ugu fiican ee aad ku sheegtid dhamaan sheekadaada. Codsigaagu wuxuu u baahan doonaa 3 wareysiyo:

1. sida loo buuxiyo foomka su'aalaha aasaasiga ah;
2. Mid ka mid ah suurta galnimada kiis Dublin;
3. Wareysiga Magangalyada. Macluumadka halkan ku qorani waxay ka hadlaysaa waraysigan saddexaad.

Intii lagu gudajiray wareysigan, shaqaale ka socda Xafiiska Wakiilka Qaxootiga (RefCom) ayaa ku weydiin doonta sababta aad uga soo tagtay wadankaagii asalka ahaa iyo sababta aad kugu kaliftay inaadan awoodin in lagugu celiyo halkaas. Waxkasta oo aad tiraahdid ama sameyso inta lagu gudajiro wareysiga si adag ayey sir u tahay; qofna looma sheegi doono wax ogolaansho la'aan ah, oo ay ka mid yihiin asxaab ama qoys toona xubnaha halkan Malta kula jooga.

Waa muhiim inaad fahanto su'aalaha uu ku waydiinaayo qofka ka socda xafiiska wakiilka xaqootiga (RefCom) isla markaasna isna fahmo jawaabahaaga. Haddii aad ubaahantahay tarjubaan, iyaga (RefCom) ayaa kuu diyaarin doona turjumaan kula jooga. Sidoo kale turjumaankaaga waxaa laga rabaa inuu xafido wax kasta oo sir ah. Sidoo kale Waa macquul hadii aad waydiisato in turjumaanka lagaa bedelo ama aadan ku kalsoonayn isaga / iyada, tusaale ahaan haddii aad doorbidi lahayd nin ama naag.

KAWARAN HADDII AAN IMANKARIN WAAYO WARAYSIGAYGA?

Haddii aadan imaan karin wareysiga sababta oo ah inaad jiran tahay ama sabab kale darteed, ogeysii Wakiilka Qaxootiga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka hor ballanta wareysigaaga si lagugu sameeyo ballan kale. Imaanshaha wareysigaaga aad bey muhiim u tahay, kaliya sababo aad u muhiim ah ayaa loo isticmaali karaa marmarsiinyo in lagu dhaafo ama dib laguugu dhigo waraysigaaga.

Sidoo kale, xusuusnow in in xafiiska qaxootigu dad badan waraysto sidaa darteed haddii aad waydiisato in mudada waraysigaaga dib laguugu dhigo oo aadan iman karin , laga yaabee inaad sugto mudo aad u dheer oo kale.

SIDEEBAAN U DIYAARIN KARAA WARAYSIGAYGA QAXOOTINIMO?

Wareysigaaga waxaa lagu qaban doonaa xafiiska qaxootiga(RefCom) ee adereska hoos ku qoran:

35/37/37, Rue D'Argens,
Msida

Asylum, Migration and Integration Fund
Project is part-financed by the European Union
Co-financing rate: 75% EU Funds; 25% Beneficiary Funds
Sustainable Management of Migration Flows

Waqtiga ku imow! Maalinta wareysigaaga waa inaad timaadaa ugu yaraan 30 daqiiqo kahor wareysigaaga. Tani waxay sidoo kale kaa caawin doontaa inaad nasasho iyo raaxo badan hesho ka hor waraysigaaga.

Waa inaadan walwalin haddii aadan haysan wax dokumentiyo ah, maxaa yeelay kiiskaaga laguma go'aaminayo haddii aad leedahay ama aadan haysan. Hadaad dokumentiyo haysatid u qaado wareysiga. Haddii qof si ammaan ah kuu soo diro dukumiintiyo, tan u sheeg xafiiska qaxootiga (RefCom) iyo Hay'adaha caawiya qaxootiga oo kaa caawin kara inaad hesho iyaga.

Hadaad haysatid waqti, maalmaha ka horeeya wareysiga iskuday inaad soo xasuusatid ama uruuriso macluumaad muhiim ah sida sida meelaha, taariikhaha, dadka iyo dhacdooyinka. Waxay kaloo kaa caawin kartaa inaad wax qorto, ama sawirto si aad u xasuusatid.

La soco in inta lagu guda jiro wareysiga waxaad ubaahan kartaa inaad ka hadashid dhibaato ama xanuun aad wakhti soo martay. Tusaale ahaan, adiga ama qof kasta oo qoyskaaga ka mid ah ma la xirey, xabsi, garaacid, jir dil ama kufsi? Qof ehelkaaga ah ma la dilay? Ma sameysay Wax kasta oo ka xanaaqay ama ka xanaajiyey qoyskaaga ama bulshada deegaankaaga? Ma dareentaa in lagaa saaray bulshadaada ka timid sababtoo ah waxa aad rumeysan tahay ama howlaha aad qabatid? Haddii aad ka fikireyso ama ka hadlaysid Khibradahaani waa kuwa aad u adag, la xiriir Ururka taageera qaxootiga.

Waa hubaal inay adagtahay in la sheego waxa muhiimka ah in laga hadlo inta lagu gudajiro wareysigaaga. Xusuusnow taas xafiiska qaxootigu (RefCom) waxay ubaahantahay inay fahanto sababta aad uga baqeyso in laguugu celiyo wadankaagii hooyo, markaa waxkastoo sharraxaya tani waa mid waxtar kuu leh. Haddii aadan hubin waxa wax tarka leh , la xiriir Ururka kaalmaynta hagista qaxootiga.
waxa laga yaabaa inaad ka maqashay sheekooyin ka yimi qaxooti kale ama aad isticmaasho oo ah waxaas dheh waxaas ha odhan, Ka taxaddar maadaama sheekadaadu tahay mid adiga kuu gaar ah. shaqaalaha waraysiga kaa qaadaya ayaa kiiskaa aad u yaqaan.

xaalada wadanka aad ka timi asal ahaan hadaad war been ah ama sheeko been ah aad ka sheegto way ogaan karaan xaqiiqda, tani waxay kuu horseedi kartaa iyagu inay rumaysan waayaan wax kasta oo tidhaahdo xataa haday run tahay.

OGHAYSIIS MUHIIM: Haddii aad bedesho adereskaaga (cinwaankaaga) inta lagu gudajiro nidaamka rafcaanka, ha ilaawin inaad ogeysiiso xafiiska qaxootiga (RefCom) maadaama ay ubaahantahay cinwaankaaga si uu kuugu soo diro ogeysiisyo iyo go'aano

MA HELIKARAA LOOYAR AMA ABUKAATE I CAAWIYA ?

Wareysiga ka hor waxaad kala hadli kartaa qareen ama Urur kaa Taageera qaabka waraysiga. Intaa waxaa dheer, waad u kaxaysan kartaa qareen inta lagu guda jiro wareysigaaga, laakiin

Asylum, Migration and Integration Fund
Project is part-financed by the European Union
Co-financing rate: 75% EU Funds; 25% Beneficiary Funds
Sustainable Management of Migration Flows

qareen bilaasha lagu siin maayo waa inaad bixisaa lacagtiisa . ama waxad la xiriiri kartaa ururka taageera qaxootiga oo bixiya hagitaan sharci oo bilaash ah..
Haddii aad ka yar tahay da'da 18 sano, ilaaliyahaaga sharci ayaa kula joogi kara inta lagu jiro wareysigaaga.

MAXAA IGU DHICI KARA AMA UU KA KOOBANYAHAY XILIGA AAN KU JIRO WAREYSIGA?

Waraysiga waxa ka koobantihiin adiga , qofka waraysiga kaa qaadaya iyo haddii loo baahdo turjumaan. Wareysiga waa la duubayaa, kambuyutarkana(computer) waa lagu qorayaa kiiska. Qofka waraysiga kaa qaadaya ayaa ku waydiin doonaa dhowr su'aalood oo kusaabsan noloshaada intaadan imaan Malta: Qoysaaga,magaalada / tuulada / tuulada aad ku soo kortay, marxaladaha adag, waxbarashada, shaqada, iwm. qofka ku waraysanaya wuxu ku qori doonaa kombuyutarka dhamaan suaalaha iyo jawaabaha aad is waydaarsateen waxaana lagu siin doonaa koobigooda marka aad goaanka hesho.

Wareysiga wuxuu socon karaa ilaa saacado, iyadoo kuxiran sheekadaada. Hadaad ubaahantahay nasasho ama xoogaa biyo ah, la socodsii shaqaalaha arrinka . Dhererka wareysiga ma saameyn doono natiijadiisa.

hadaad dhib kala kulanto turjumaanka ama aanay iyadu ama isagu sifiican u turjumayn jawaabahaaga ama aad doonayso nin ama naag ka kuu turjumaya waxaad u sheegi kartaa qofka kaa qaadaya waraysiga hal mar uun.

MAXAA LAY WAYDIIN DOONAA XILIGA AAN KU GUDA JIRO WAREYSIGAYGA?

Waxaa jiri doona dhowr su'aalood oo ku saabsan asalkaaga, si xafiiska qaxootigu u noqdo mid fahansan meesha aad ka timid. Ka dib waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo ku saabsan sababta aad u waydiisanayso magangelyo Malta, iyo sababta aad uga cabsaneyso in laguugu celiyo dalkaaga hooyo.

SIDEE U DHAQMI KARAA AMA DABEECAD NOOCEEYA AYAA LOO BAAHANYAHAY XILIGA WAREYSIGA?

Tani maahan tijaabo ama imtixaan, laakiin waa wareysi lagu fahmayo sheekadaada. Ha dareemin cabsi ama cabsi gelin, waa fursadaada inaad ku sharaxdo dalabkaaga! Waxaanu kusiinaynaa talo:

- Had iyo jeer runta sheeg. Beenta beentu waxay saameyn ku yeelan kartaa qaabka qofka ku waraysanaya iyo turjumaankuba u turjumaan sheekadaada. Waxay sidoo kale ka dhigi kartaa sheekadaada mid aan iswaafaqsanayn ama aan macquul aheyn;
- Noqo mid joogto ah iskuna day inaad hayso isla sheekadaada. Hadaad bedesho wax ama xasuusato waxyaabo cusub, waxay ka caawin doontaa qofka ku waraysanaaya maxaad u bixisay macluumaad kala duwan markii hore iyo hadda
- Haddii aadan ka jawaabi karin su'aal, tusaale ahaan sababta oo ah ma xasuusan kartid ama ma garaneysid jawaabta, runta sheeg Waa caadi oo dheh "ma ogi" ama "Ma xasuusto";

Asylum, Migration and Integration Fund
Project is part-financed by the European Union
Co-financing rate: 75% EU Funds; 25% Beneficiary Funds
Sustainable Management of Migration Flows

- Tani waa wareysigaaga, sidaa darteed waqti u qaado inaad ka fikirto oo aad uga jawaabto su'aalaha.haddii aadan fahmin su'aasha, ha biqin dheh maan fahmin suaashaas iigu celi ku dheh qofka ku waraysanaaya;
- Su'aalaha ku saabsan noloshaada gaarka ah lama oggola, waana awooda inaadan ka jawaabin!.

KA WARAN XUBNO QOYSKAYGA KA MID AH OO IYANA ILA JOOGA MALTA OO QAXOOTI DALBANAYA SIDAYDA?

Waxaa laguu wareysan doonaa keli. Xubnaha qoyskaaga ayaa lahaan doona waraysi u gaar ah haddii ay da'doodu weyntahay. Xusuusnow wareysigu gebi ahaanba waa mid sir ah,oo ay ku jiraan reerkaaga. Mararka qaarkood, qaxootigu waxay dareemaan in sheekadooda aysan ku jiri karin sida ninkooda, xaasaskooda ama waalidkood. Wareysigaagu waa adiga adiga!.

Xusuusnow in daryeelka-caruurtaada aan la bixin doonin inta lagu wareysanayo. Hadaadan dareemaynin si raaxo leh inaad ka bixiso sheekadaada oo dhan carruurtaada hortooda, way kuu fiicnaan lahayd adigu inaad raadsato qof daryeeli kara inta lagu jiro Wareysigaga.

XILIMA IYO GOORTEE AYAAN HELI DOONAA GOAANKA?

Maheli doontid go'aan isla maalinta wareysigaaga magangalyo. Go'aanka ayaa qaadan kara bilooyin, badiyaa inta u dhaxaysa 6 iyo 8 bilood, laakiin sidoo kale way qaadan kartaa muddo dheer waxay kuxirantahay tirada codsi ee ay heshay xafiiska qaxootigu.

Hadaad u baahantahay warbixin dheeraad ah la xidhiidh ururka caawiya qaxootiga eeAditus ee teleefankuudu yahay **+356 2010 6295 | www.aditus.org.mt | info@aditus.org.mt**

Asylum, Migration and Integration Fund
Project is part-financed by the European Union
Co-financing rate: 75% EU Funds; 25% Beneficiary Funds
Sustainable Management of Migration Flows